



Sookoobid : Habka Xalinta Cabashooyinka ee Mashaariicda Damal Cafimad (P172031) iyo Mashruuca Talaalka COVID-19 (P176956).

1. Hordhac:

Habka cabashada waa mid kamida hababka badan ee mashruucu adeegsado si loo xaqiijiyo ka qeeybgalka daneeyayaashan iyo in xohtu faafto taaas oo usahleeyso in daneeyayaashu cabashadooda usoo gudbistaan si kudhisan is fahan si degdegana loogu xaliyo. Wazaaradda caafimaadka ee federaalka ayaa iskaleh mas'uuliyadda xallinta cabashooyinka ka dhanka ah mashaariicda damal cafimaad iyo covid-19 ayadoo tixraaceeysa sharciyada dowladda federaalka ee Somalia iyo xeerarka Bankiga adduunka ee dhoowrista dadka iyo deegaanka. Wazaraaddu waxeey hubineeyso in habka cabashu yahay mid cad si fududna eey ku heli karaan ama gaari karaan dhammaan daneeyayaasha.

2. Ujeedooyinka:

Ujeedad uguweeyn ee habka cabashada waxeey tahay in uu caawiyo xallinta cabashooyinka waqti kooban, leeskuna halleey karo kaas oo qancinaya dhammaan dhinacyada ku lugleh. Habka cabasha waxuu nasiinayaa habraac cad, leesku halleyn karo iyo xal-waaro.

2.1 Ujeedooyinka Qaaska:

Ujeedada habka cabasha ee mashaariicda damal Cafimad iyo Covid-19 waxuu yahay:

- In la siiyo waddo wax ku ool ah oo loogu talagalay dadka/hay'adaha dhiban si ay u muujiyaan dareenkooda oo ay si ammaan ah u xalliyaan arrimaha/cabashada ay sababeen hawlaha mashruuca.
- Kor-u-qaadista xidhiidh wax-dhis leh oo ka dhexeeya xubnaha bulshada, dadka mashruuca saameeyay, Dowladda federaalka ah, dowlad goboleedyada, wazarrad caafimaadka iyo bankiga adduunka.
- Ka hortagga iyo wax ka qabashada welwelka bulshada;
- in uu Caawiyo hababka badan ee abuura isbeddel bulsho oo togan; iyo
- inuu dhaqso u aqoonsado xaliyana arrimaha u horseedi kara dacwadaha garsoorka.

3 Nuucyada Cabashada

- Cadaalad falida heshiisyad;
- Arimaha la xariira musuqmaasuqa iyo wax isdabamarinta;
- Kala saariida dadka fursad ddonka ah;
- Latashi la'aan bulshada mashruuca loogu tala galay;
- Saameey taban oo dadka iyo deeganka ah;
- Cabasho mushaar;
- Arimaha la xariira tayo xumo addegga ;
- Xaquuqda shaqaalaha
- Shaqaaleysiinta carruurta iyo qatarah badqabka bulshada

3.1 Habka Cabashada iyo waqtiga xalinta

1. Helid, diwngalin kadibna sheegid in cabshada la helay. Cabashooyinka culus waxaa si dhaqsa ah loogu gudbinaa madaxa mashruuca kaas oo 2 maalin gudaheed oo u gudbi doono iskuduwaha mashruuca..
2. Isbuuc gudahiiis in lagu baaro waxyaabaha eey cabashu salka ku heeeyso.
3. In xalka lagu gaaro 21 maalin, cawadaha jawaab la siiyo
4. Tacaadiyada ka dhankaa shaqaalaha iyo loo adeegaha waxaa lagu xalinaa 24hrs gudaaho
5. Cabashooyinka waxaa lagu soo gabagabeeynaa 30 maalin gudahood

4 Habka xalinta Tacadiyada

Guddi qaasa ah oo katirsan gudiga xallinta khilaafadka ooy ka midyihiin latilyaha arimaha bulshada ee labada mashruuc ayaa qabadana doona markasta eey soo ifbaxdo cabshaso la xariirta tacadiya ka dhanka ah shaqaalaha ka faaideesta yasha masruuca. Gudiga ayaa hubin doona in anshaxa shaqaalah loo adeegsaday sida uu ugu qoranyahay xeerka anshaxa shaqaalaha.

- Mashruucu waxuu raacaa hanaanka hormarinta dhibana. Majirto warbixin la gudbi karo ayadoon ogolaasho laga heeysan dhibanaha.
- Hubinta iyo fududaynta dariiqa gudbinta badbaadaha waa in loo soo bandhigaa si degdeg ah adeeg bixiyayaasha ku haboon iyadoo lagu salaynayo dookhooda iyo ogolaansho xog ogaal ah, sida daryeelka caafimaadka, adeega taageerada bulsheed iyo taageero sharci, hoy degdeg ah, iyo adeeg kasta oo kale ee lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay.

4.1 Janalda Gudbinta Cabashada

- ❖ [Telephone/whatsApp/numberka cabashada: 7575](tel:7575)
- ❖ emails: fmoh.complaint@gmail.com; and fmoh.complaints.seah@gmail.com
- ❖ Ugudba shaqaalaha ku shaqada leh ee labada mashruuc
- ❖ [Ku rid sanduuqa cabashada.](#)
- ❖

5 Sare-uqaadid wacyiga

Sare-uqaadida wacyiga habka cabasha ee shaqaalah, qandaraaslayaasha, shaqaalaha caafimaadka iyo bulshada iyadoo la adeegsanayo posters, flyers, radio.

6 Dabagal iyo Riboot-gareeyn

- Buugga diiwaanka iyo dabgalka cabashooyinka
- Riboot bille
- Mashruuca waxa uu dabagaala tacadiyada la xariira goobta shaqada iyo ka faaideestayaasha masruuca.